

KU SOO DHAWAW VATTENRIKET!



Vattenriket waa meel leh dabecad wacan oo kala bed-beddelan oo lagu magacaabo Vattenriket. Meeshu waa ay weyntahay, 35 x 35 kiiloomitir. Webiga biyo mareenka Helge ayaa si isdhaaf ah u dhex mara berriga oo ku shubma badda. Biyo mareenka waxa cirifka ku haya dhul qoyan iyo biyo iyo caws iska dhexbaxay iyo geedo caleemo badan iyo dhulbeereed bacaad ah. Dabecadaas kala duwan waxaa ay keenaysaa in xayawaanno iyo geedo fara badan ka helaan meesha.

Xarunta booqashada naturum ee Caalamka biyaha waxaa ka sheekeynaya tilmaamayaal xagga dabecada ah iyo bandhig ku saabsan meesha shimbiraheeda, mallaaygeeda iyo cayayaankeeda yar-yar ku saabsan. Waad ka qayb-geli kartaa dhaq-dhaqaaqa kala duwan, ku raaxaysan kartaa bilicda, qaxweyn-kartaana.

Halkan waa ay adagtahay in laga aado Vattenriket. warbixin ku aaddan 21 meelood oo la booqdo, buundo alwaaxeed iyo minaarad-shimbireed. Meelaha la booqdo waxaa ay suura gelinayaan in loogu raaxaysto dabecada siyaabo kala duwan, sanadka oo dhan. Waad ku dabaalan kartaa, wax ku duban kartaa, ku lugayn kartaa shimbirane ku daawan kartaa.

2005 waxaa Vattenrike ee Kristianstad loo magacaabay in ay noqoto meel ka tirsan barnaamijka Yunesko ee hagaajinta xiriirka dabecada iyo dadka. Laga soo billaabo markaas waxaa uu Vattenriket u shaqeeyaa sida meel uu ka socdo horuumarka raaga- "Oo u fiican dadka iyo dabecada"! Adduunka oo dhan waxaa ka jira 700 oo meelahaas ah. Toddoba waxaa ay ku taalla Swiidhan Vattenriket waa waddanka meeshi ugu duqsan.

naturum[®] 
Vattenriket